



**ESL DEPARTMENT**  
3700 South High St.  
Columbus, Oh 43207  
Ph. 614-365-8802  
Fax 614-365-8786

---

*Mission: Each student is highly educated, prepared for leadership and service, and empowered for success as a citizen in a global community.*

---

Ku socota Waalidiinta ama Wakiilada:

Aqoonsiga (ID):            Dugsiga Hadda:            Sannad-Dugsiyeedka ( Enter School Year)

Fasalka Hadda:

Waalidka ama Wakiilka qaaliga ah,

Waxaan dhawaan qiimaynay ubadkaaga/ilmahaaga aqoontiisa luuqadda Ingiriisiga anaga oo adeegsanayna Baaraha/Baadhaha Aqoonta Luuqadda Ingiriisiga ee Ohio (OELPS21).

Aqoonta ilmahaaga ee Ingiriisiga waxa lagu cabbiraa/qiyaasaa:            Baaraha/Baadhaha Aqoonta Luuqadda Ingiriisiga ee Ohio (OELPS21). Haddii ilmuhu ka hooseeyo heerka Aqoonta, waxay heli doonaan adeegyada barnaamijka ESL-ka. Ardayga heerka aqoonta u leh waxaa la sii wadi doonaa in lala socdo horumarkiisa. Nooca adeegyadu way ku kala duwanaan doonaan goobta iyo heerka fasalka.

Haddii la go'aamiyo in ilmahaagu buuxiyey shuruudaha waxay heli doonaan taageero dheeraad ah si ay uga caawiso inay si fiican u yaqaanaan/u-bartaan ku hadalka, dhegeysiga, akhrinta, iyo qorista Ingiriisiga haddii aanay horeba ugaarin/u gaadhin heerka aqoonta. Adeegyadu waxay ka caawin doonaan ilmahaaga inuu buuxiyo da'da ku habboon heerarka guusha tacliimeed ee horumarinta iyo qalin-jabinta. Qiimaynta Aqoonta Luuqadda Ingiriisiga Ohio (OELPA) ayaa la siin doonaa gu'/sanad kasta si loo cabbiro/loo qiyaaso horumarka ubadkaaga/ilmahaaga, ilaa ay ka keenaan/ka dhayiyaan goolka sida ay u yaqaaniin Baaraha/Baadhaha Aqoonta Luuqadda Ingiriisiga Ohio. Marka ilmahaagu ka baxo barnaamijka, wax-qabadkooda ayaa la sii wadi doonaa in lala socdo si loo go'aamiyo haddii loo baahan yahay taageero waxbarasho oo dheeraad ah.

Haddii ilmahaagu naafo yahay/qabo baahiyaha gaarka ah, barnaamijka Ingiriisiga sida Luuqadda Labaad (ESL-KA) ayaa isku dubaridi doona shaqaalaha ku habboon si loo gaaro ujeedooyinka Waxbarashada Gaarka ah ee ilmahaaga ama Qorshaha ah 504 (504 Plan).

Waxaan si adag ugu dhiirigelinayaa ka qay-bgalka ubadkaaga/ilmahaaga ee barnaamijka Ingiriisiga sida luuqadda labaad waxaana kugu martiqaadayaa inaad wax badan ka ogaato faa'iidooyinka barnaamijka. Si kastaba ha ahaatee, waxaad xaq u leedahay inaad ilmahaaga ka saartid barnaamijka barashada luqadda wakhti kasta.

Haddii aad jeclaan lahayd inaad ka hadasho/wax ka tiraahdo horumarka ilmahaaga ee horumarinta luqadda Ingiriisiga iyo guusha tacliinta/waxbarashada fadlan la xiriir/la xidhiidh macalinka ilmahaaga ama maamulka dugsiga si aad ballan u samaysato.